

Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo (FAQ): Waxa laga rajaynayo tallaalka furuq-daayeerka (hMPXV), JYNNEOS

(9-2-2022)

Inaad istallaasho waa tallaabo muhiim ah oo aad u qaadday dhanka ilaalinta naftaada iyo bulshadaada

Agoosto 9, 2022, FDA waxay soosaartay oggolaanshaha isticmaalka degdegga ah oo ay kula talisay in bixiyayaasha daryeelka caafimaadku ay bixiyaan tallaalka furuq-daayeerka (hMPXV), JYNNEOS, iyagoo dadka maqaarka kaga mudaya.

S: Waa maxay kaga mudista maqaarku?

[Kaga mudista maqaarku](#) waa marka qofka daawada ama tallaalka laga siiyo maqaarkiisa oo loo yaqaan diirka. Kani wuxuu la mid yahay qaabka baaritaanka maqaarka ee qaaxada loogu mudo. Ku mudista maqaarka waxa laga siin karaa maqaarka gacanta qaybta hore ama gacanta qaybta sare.

S: Waa maxay sababta looga tagay qaabkii soo-jireenka ahaa ee tallaalka ee loogu gudbay qaabka maqaarka lagu mudayo?

[Daraasad ahayd 2015](#) ayaa muujisay in marqaadasho yar oo tallaalka ah oo qofka laga siiyo maqaarka hoostiisa ay ahayd mid u waxtar badan sida marqaadasho badan oo qofka laga siiyo nudda u dhaxaysa maqaarka iyo muruqa, oo sidoo kale loo yaqaan mudista subcutaneous. Dadka ka tirsanaa kooxda qaadatay tallaalka maqaarku waxay yeesheen lid-jidh galayaal tiro ahaan la mid ah (borotiinada la dagaalama caabuqa) dadka ka tirsan kooxda qaadatay tallaalka subcutaneous.

Maadaama tallaalka maqaarku uu u baahan yahay xaddi yar oo tallaalka ah si uu u sameeyo jawaab difaac oo la mid ah, hal dhalo oo ah JYNNEOS ayaa laga heli karaa ilaa shan marqaadasho oo tallaalka ah. Nuugista gaabiska ah ee tallaalka ee lakabyada maqaarka ayey dhici kartaa inay ugu wacan tahay noocan mudista ee sida fiican u shaqaysa.

Dadka ka yar da' ahaan 18 jir ama dadka leh taariikh xagtimo qaro wayn, oo soo taagan oo la dhaho keloids waxa tallaalka loo siin qaabka subcutaneous, maya maqaarka hoostiisa.

S: Ma qaadan karaa tallaalka maqaarka hoostiisa haddii marqaadashadaydii koowaad ee tallaalku ahayd subcutaneous?

Haa. Labada qaab ee mudista waa laga helaa difaac ka dhan ah furuq-daayeerka.

S: Maxaan filan karaa marka laga hadlo waxdhimaalada?

Mudista maqaarka hoostiisa, ugu dhawaan qof kasta wuxuu dareemaa xanuun, casaansho, barar, cuncun, ama nabar ka soo baxa barta mudista maqaarka hoostiisa. Falcelinadaan waxay socon karaan dhowr maalmood ilaa toddobaadyo. Dad badan waxay yeelan karaan nabar ama midab-doorsoon ku yimaadda meesha laga muday in ka badan hal bil kadib mudista maqaarka hoostiisa. Marka loo eego mudista maqaarka hoostiisa, mudista subcutaneous waxay leeyihiin falcelino la mid ah laakiin ka hawl yar.

Dadku waxay waajihi karaan murqo xanuun, madax xanuun, tamar la'aan, yalaalugo, iyo qarqaryo dhawr maalmood kadib mudista. Haddii aad ka welwelsan tahay waxdhimaalada aad dareemeyso, wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ama waaxda caafimaadka deegaankaaga.

Wac 911 isla markiiba haddii aad dareento inaad yeelanayso falcelin xasaasiyadeed. Tan waxa ka mid noqon kara barbarar, barar wejiga iyo cunaha ah, qofka oo neefsigu ku adkaato, garaaca wadnaha oo kordha, dawakhaad, ama tamar darro.

S: Goorma ayuu tallaalka bilaabi doonaa inuu iga difaaco furuqa daanyeerka?

Garoojada ugu horreysa ayaa bilowda kahortaga furuqa daanyeerka. Dadka intooda badan wuxuu jirkoodu sameeya lid-jidh gale ka dhan ah furuqa daanyeerka laba toddobaad kadib tallaalka koowaad, balse kahortagga ayaa bilawda laba toddobaad kadib garoojada labaad. Waxaan ku talinaynaa in qof kasta qaato garoojada labaad.

S: Goorma ayaan heli doonaa garoojada labaad?

Waxaad heli doontaa marqaadashada labaad 28 maalmood kadib ta koowaad. Kooxdaada tallaalka ayaa kaa caawin doontaa muddaynta marqaadashada labaad. Inta wakhtigaas ka horraysa, sii wad shaqada fiican ee aad iskaga ilaalinayso furuq-daayeerka.

S: Waxaan lahaa barbar badan, casaansho iyo xanuun meesha laga iga muday kadib tallaalkaygii maqaarka hoostiisa ee koowaad.

Haddii aad ku lahayd falcelin daran tallaalkii maqaarka hoostiisa ee koowaad iyo/ama aad leedahay falcelin meesha lagaa muday taasi oo wali muuqata wakhtiga marqaadashada labaad, waxa lagu sii doonaa marqaadashada labaad qaabka mudista subcutaneous-ka maadaama falcelinaha mudista ee noocan mudista ah ayna badnayn oo ayna dhib badnayn.

Intaad sugayso marqaadashada labaad, halkan waxa ah waxyaalo aad samayn karto si aad naftaada iyo bulshada uga ilaaliso furuq-daayeerka:

Aqoontu waa awood. La soco xaqiiqooyinka ku saabsan furuqa daanyeerka ee laga helo ilaha lagu kalsoonaan karo. Macluumaadka si degdeg ah ayuu isku beddeli karaa. La hadal dadka aad ku kalsoon yahay ee qaybta ka ah nololshaada, saaxiibadaada, iyo lammaanahaaga galmada.

Kahortag fonqorta/ceebeynta. Qof kasta ayuu ku dhici karaa furuqa daanyeerka. Ma jirto wax ceeb ah oo la xiriiirta ogaanshaha inaad qabtid furuqa daanyeerka. Qaar badan oo naga mid ah ayaa ogaanaya inaan qabno maadaama aan qaadeyno tillaabooyin firfircoon si aan u ilaalino caafimaadkeena oo aan uga dhigno bulshadeena mid ammaan ah. Fonqortu waxay naga hor joogsataa inaan helno daryeel caafimaad oo la xiriirida lammaaneheena galmada, waxayna dhaawacdaa caafimaadka maskaxdeena. Ma jirto wax ceeb ah oo la xiriiirta in la ogaado inaad qabtid furuqa daanyeerka (hMPXV).

Ogow sida furuqa daanyeerka la isugu gudbiyo. Furuq-daayeerka waxa la isku gudbiyaa marka qofku taabto maqaarka qofka cudurka qaba ee leh nabarada ama dheecaanada jireed ee furuq-daayeerka. Taabashada noocaan oo kale ah ayaa dhici karta inta lagu gudajiro hawlaha sida, shumiska, koolkoolinta iyo galmada. Sidoo kale waxay dhici kartaa marka la daryeelayo qof qaba furuq-daayeerka, ama ku dhacda taabashada qoyska ee caadiga ah ee sida badan ka dhex dhacda qoyska dhexdooda. Galmo shardi uma aha in gudbitaanka furuq-daayeerku dhaco.

Ogow astaamaha. Ka hubi jidhkaaga. Astaamaha waxaa ka mid ah firiiricyo cusub, nabarro, booggo iyo dhibco. Dadka qaarkood ayaa sidoo kale yeesha qandho, madax-xanuun, qanjidho barar iyo xanuun leh, murqo xanuun ama daal. Haddii aad dareento inay wax khaldan yihiin, aad qabtid firiiric ama aad leedahay astaamo kale oo walaac leh, ka fogow taabashada, gaarka ah iyo maqaar-ka-maqaarka ah ee dadka kale, oo ula hadal bixiye daryeel caafimaad sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo. Iyadoo dadka badankooda ay si badqab leh ugu raystaan guriga, daawayn ayaa diyaar u ah dad badan oo qaba ama halis ugu jira inay si daran ugu jirraadaan cudurka. Bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ayaa kaa caawin kara inaad go'aan ka gaarto in daawadu kugu habboon tahay iyo in kale.

Haddii aad rumaysan tahay inaad qabto furuq-daayeer xataa haddii lagu tallaalay, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama [waaxda caafimaadka deegaanka](#) ayaa noqon kara meel caawimo leh oo aad ka hesho macluumaad, baaritaan, daawayn iyo tallaal adiga iyo lammaanahaagu.

Qorshe sii samayso. Haddii aad ka fikirayso inaad kaqaybgasho dabbaaldeg, riwaayad, xaflad ama dhacdo kale, si gaar ah ula soco muddada aad cid u dhawaanayso, si gaar ah iyo taabashada jir-ka-jir ee dhici karta. Tusaale ahaan, dhacdooyinka ciyaaraha ama riwaayadaha ee dadku laga yaabo inay si buuxda dhar u xiran yihiin oo ayna u dhawayn in maqaarkoodu istaabto ayaa ka ammaan badan kalaabyada iyo xafladaha dadku ay xiran yihiin dharka gaagaaban ee kooban. Sida badan waxa jirta istaabasho maqaarka ah meelaha qolalka uumiga, mukhmaaradaha khaniisiinta ama kalaabyada galmada ee ay

dadku xiran yihiin ama ayna xirnayn dharka ugu yar, sida badanna waa istaabasho galmeed.

Markaad ku fikirayso inaad samayso galmo, la xiriir lammaanahaaga. U sheeg sida aad dareemeyso, haddii aad dhowaanahan jirratay ama firiircyo ka soo baxeen, gaar ahaan xubnaha taranka ama dabada, una sheeg inay sidaas oo kale sameeyaan. Haddii adiga ama lammaanahaaga aad dhowaan jirrateen, hadda aad jiran tihiin, ama aad qabtaan firiiric cusub, iska ilaali is-taabashada, gaarka ah iyo maqaar-ka-maqaarka ah, oo la hadal bixiyaha daryeelka caafimaadka. Si furan inaad ula xiriirto lammaanaha iyo inaad iska ilaaliso galmada marka aad jirran tahay ayaa ah habdhaqan wanaagsan guud ahaan.

Haddii aad doorato inaad galmo samayso, dooro hawlo aan ku lug lahayn is-taabashada tooska ah, maqaar-ka-maqaarka ah ama shumiska, dabool firiirica, dhaq gacmaha, shukumaanada, gogosha, alaabta galmada iyo agabka kale isla markaaba, oo tixgeli inaad xaddiddo tirada lammaanayaasha. Kondhomyadu si buuxda ugama hortagaan faafitaanka furuq-daayeerka laakiin waxay ka hortagaan faafitaanka caabuqyada kale sida xabbadda (syphilis), jabtida, kalamiidiya iyo HIV.

Tixgeli inaad samaysato koox yar oo aad la xiriirto. Dooro hal qof ama koox yar oo dad ah oo ku heshiia inaad galmo sameynin haddii aad jirran tahay ama isku aragtaan wax firiiric cusub ah.

Xitaa haddii aad samayso kulamo galmo oo qarsoodahi, qorshee inaad hayso lambarka telefoo nka (ama nooc kale oo macluumaadka xiriirkaah) ee lammaanahaaga haddii aad u baahato inaad goor dambe la xiriirto. Qaabkaas ayaad ula xiriiri kartaa si aad u ogeysiiso inay iska baari karaan furuqa daanyeerka ama isku tallaali karaan haddii ay u-qalmaan.

Horay u sii wac. Haddii aad u malaynayso inaad qabto astaamo la xiriira furuqa daanyeerka, u sheeg bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga kahor inta aadan booqan si lagu daryeelo. Haddii aad qorshaynayso inaad isticmaasho daryeelka degdeg ah ama qolka gurmada degdega ah, u sheeg shaqaalaha hubinta imaanshaha inaad u malaayso inaad qabto furuqa daayeerka. Waxay kuu sheegi doonaan inaad xirato maaskaro waxayna kaa caawin doonaan inaad daboosho firiiric kasta oo maqaarka ku yaala oo bannaan marka aad sugayso daryeelka.

Su'aalaha? Haddaad yeelato astaamo, u baahato baaritaan, ama qabto su'aalo ama tabasho, fadlan la xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama maamulka caafimaadka dadwaynaha deegaankaaga.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Xiriirrada ee COVID-19 lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.